


Buug-gacmeedka Tignoolajiyadda ee Qoyska iyo Ardayga

SHAXDA TUSMADA

Macluumaadka aaladda iyo waxyaabaha laga filayo ardayda iyo qoysaska	2
Qaadashada Aaladda Ardayga	2
Mas'uuliyadda Isticmaalka iyo Daryeelka Aaladaha	2
Dayactirka Aaladda	3
Beddelaadda Agabka	3
Qorshaha Ilaalinta Aaladda	3
Faahfaahinta Qorshaha Ilaalinta Aaladda	4
Xidhmada Aaladaha Ardayga	5
Heshiiska Isticmaalka Teknoolajiyadda ee Qoyska iyo Ardayga	5
Macluumaadka Qoysaska	5
Madasha Waxbarasho	5
Infinite Campus-ka	6
Schoolology-ga	6
Seesaw-ga	6
Ilaha dheeriga ah ee qoysaska	6
Heshiiska Isticmaalka Teknoolajiyadda ee Qoyska iyo Ardayga	7
Qorshaha Ilaalinta Aaladda	7
Heshiiska Isticmaalka ee Qoyska iyo Ardayga: Chromebuugga ama iPad-ka	7
Saxiixyada	7



Ku soo dhawoow Dugsiyada Aagga Robbinsdale. Buug-gacmeedkani waxaa loo sameeyay qoysaska si uu ugu hago tiknoolajiyada waxbarashada ee aan siinno ardayda.

Macluumaadka Aaladda iyo Waxyaabaha laga Filayo Ardayda iyo Qoysaska

Dugsiyada Aagga Robbinsdale (Rdale) ayaa ardayda u siiya marin u helka ilaha tignoolajiyada degmada ee ujeedooyinka waxbarasho. Isticmaalka qalabka elektaroonigga ah, nidaamyada iyo gelitaanka internetka degmadu waa iskaashi ka dhexeeya ardayda, qoysaska iyo shaqaalaha Rdale.

Iyada oo qayb ka ah iskaashigan, waxaan uga baahanahay ardayda inay raacaan siyaasadaha degmada, oo ay ku jiraan: [Siyaasadda 514, Mamnuucidda Xoogsheegashada, Siyaasadda 524, Siyaasadda Isticmaalka iyo Badbaadada Internetka ee La Aqbali Karo, Siyaasadda 506, Anshaxa Ardayga](#), iyo tilmaamaha lagu xusay [Buug-gacmeedka Ardayga](#).

In kastoo aan siinno aaladaha ardayda, aalad kastaa waxay ahaanaysaa hantida Dugsiyada Aagga Robbinsdale waxaana laga yaabaa in degmada ay dib u eegto wakhti kasta. Aaladaha waxa loo qoondeeyay arday kasta, kuwaas oo u baahan magac adeegsad iyo erey-gudubka Rdale oo sax ah si loo hawlgeliyo.

Qaadashada Aaladda Ardayga

Ardaydu waxay helayaan Chromebook ama iPad. Helitaan interneedka ayaa loo baahan yahay si shaqooyinka intooda badan loo xafido loona wadaago.

Haddii ardaygu aanu heli karin intarneetka, fadlan kala xiriir dugsigooda ilaha Internetka. Goobo kala duwan oo bulshada ka mid ah ayaa bixiya helitaanka internet-ka bilaa-waayirka ah ee bilaashka ah, oo ay ku jiraan maktabadaha dadweynaha. Xarumahayaga warbaahintu waxay sodoo kale leeyihiin tiro xadidan oo hotspot-yada ah (aaladaha WiFi-ga Internet gacanta) ee ardaydu qaadato.

Dhismayaasha dugsigu waxay siiyaan ardayda aaladaha inta lagu jiro munaasabadaha qaybinta ee loo qorsheeyay. Dugsigu wuxuu la socodsiiin doonaa qoysaska taariikhda qaybinta.

Haddii ardaygu haysto khidmad la xiriirta aalad oo aan labixinin sannad-dugsiyeedkii hore, qoyska waxaa la ogeysiin doonaa horraanta Agoosto. Ardayda aan ka baaraandegin khidmada waxa laga yaabaa in la waydiiyo in ay aaladdooda ku hayaan dugsiga ilaa inta lacag bixinta si buuxda loo samayno ama laga diyaarinayo qorshe lacag-bixineed. Inta awoodda guri u qaadashada aaladda laga yaabo inay xadidan tahay, ardayda looma diidi doono inay helaan adeegyo waxbarasho ama manhaj khidmadaha aan la bixinin awgood.

Ardayda isdiiwaangelisa qaybinta dugsiga ee aaladaha ka dib waxay la shaqayn doonaan xarunta warbaahinta ee dugsiga si ay u helaan qalabka.

Mas'uuliyadda Isticmaalka iyo Daryeelka Aaladaha

Waxaan u baahanahay in ardayda iyo qoysaskooduba ay ka wada shaqeeyaan sidii loo hubin lahaa:

- Ardaydu waxay maalin walba keenayaan aaladdooda iyadoo si buuxda u jaajgaraysan.
- Aaladda waxa lagu xafidaa oo lagu jaajgareeyaa meel ammaan ah.

- Ardaygu wuxuu adeegsadaa galka la siiyay si uu u yareeyo khatarta waxyeelada aaladda.
- Inay la wadaagaan wixii waxyeelo ama dhib ah ee aaladda xarunta warbaahinta dugsiga sida ugu dhakhsaha badan.

Dayactirka Aaladda

Waxa laga yaabaa in aanu waydiinno ardayda kharashaadka ku baxa hagaajinta burburka aaladda loo qoondeeyay, haddii uu burburku ka dhacay dugsiga ama meel ka baxsan dugsiga. Xaaladaha qaarkood ayaa laga yaabaa inay u baahdaan kharashka beddelaada aaladda oo dhan.

Kuwan waxaa ka mid ah:

- Aalado burburay oo aan la hagaajin karin
- Aaladaha iyo agabka la xaday ama lumay
- Burburka ula kac ah
- Ku xad gudubka aaladda ama nidaamka hawlgalinta
 - Ardaydu waa inaanay isku dayin inay hagaajiyaan ama dayactiraan arrimaha qalabka xoogan ee aaladda. Tan waxaa ka mid ah adeegsiga balaastarka ama xabag.
- iPadka oo kaliya: burburka dhaca marka aaladdu ka baxdo galka ay degmadu soo saartay.

Dhacdooyin kasta oo waxyeelo, xatooyo ama luminta aalad waa in lagu soo wargeliyaa xarunta warbaahinta dugsiga sida ugu dhakhsaha badan. Tan waxa ku jira shaashadaha dildilaacsan, xataa haddii aaladdu wali la isticmaali karo.

Ardayda la kulma laba ama ka badan shilalka cilladda aaladaha hal sano gudaheed waxa laga yaabaa inay u baahdaan inay la shaqeeyaan maamulka dhismaha si ay u helaan taageero dheeraad ah. Haddii ay dhacdo saddex dhacdo oo waxyeello ah, maamulka dhismuhu wuxuu wici doonaa kulan qoyska si loo go'aamiyo sida ugu wanaagsan ee loo taageero ardayga iyo waxbarashadooda.

Haddii aaladdu ku yimaaddo burbur si ka baxsan dayactirka (sida uu go'aamiyay dayactiruhu) oo uu u baahan yahay beddelaad, qoyska waxaa laga doonayaa inay bixiyaan kharashka aaladda. Haddii ay dhacdo in la xado ama la waayo, qoysasku waxay mas'uul ka noqon karaan bixinta kharashka buuxa ee beddelka aaladda.

Haddii aaladda la fara geliyey, si ulakac ah loo waxyeeleeyey, ama uu dayac tiray dayctir aan ansaxnayn, qoysaska waxa laga yaabaa in looga baahan yahay inay bixiyaan kharashka buuxa ee beddelaada aaladda.

Aalad beddel ah ayaa la siin doonaa ardayga si kiisba-kiis ku salysan. Ardayga waxaa loo qoondayn aalad ku meel gaar ah wuxuuna raaci doonaa isla habka burburka.

Beddelaadda Agabka

Markay qaadasha aaladda, ardayda waxaa la siinayaa gal, xarig iyo jaajar. Haddii uu ku yimaaddo burbur galkii asalka ahaa, xarigga, ama alaabtan ay lunto, ardayda waxaa laga yaabaa in looga baahdo inay beddelaan alaabtan.

Chromebook-yada iyo iPad-yada waxaa lagu asteeyay claamadda hantida degmada. Waxaan codsaneynaa inaan calaamadahan la daboolin ama aan la fiiqin.

Qorshaha Ilaalinta Aaladda

Si qoysaska looga ilaaliyo kharashyada ka iman kara xatooyada ama shilalka burbur inta aaladdu ku jirto daryeelka ardaygaaga, waxaanu kugu dhiirigelinaynaa inaad u soo iibsato Qorshaha Ilaalinta Aaladda (DPP) ee arday kasta sannad kasta. Qiimaha DPP waa \$25 sannad dugsiyeedkii, arday kasta. Qiimahu waa \$5.00 sannadkii ardaygiiba qoysaska u qalma dheefaha waxbarashada. Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan daboolida DPP, fadlan la xidhiidh shaqaalaha xarunta warbaahinta ee dugsiya ilmahaaga

Faahfaahinta Qorshaha Ilaalinta Aaladda


Qorshaha Ilaalinta Aaladda	
Qiimaha sanadlaha ah ardaygiiba	\$25.00
Kharashka sannadlaha ah ee arday kasta ee qoysaska u qalma dheefaha waxbarashada	\$5.00

Ka jarid Burbur	Lahaansho Qorshaha Ilaalinta Aaladda	Qorshe Ilaalinta Aalad La'aan
Dhacdada ugu horraysa sannad-dugsiyeedkiiba	Khidmad la'aan	\$60.00
Laba ama in ka badan dhacdooyin sannad dugsiyeedka	\$25.00/dhacdodiiba	\$60.00/dhacdadiiba

Khidmadaha Xatooyada ama Luminta	Lahaansho Qorshaha Ilaalinta Aaladda	Qorshe Ilaalinta Aalad La'aan
Xatooyada leh warbixinta dhacdada booliiska oo ay soo gudbiyeen ardayga/qoyska, sannad dugsiyeedkiiba	\$50.00/dhacdadiiba	\$100.00/dhacdadiiba
lumin ka dhalata dayacaad, sannad dugsiyeedkiiba	\$100.00/dhacdadiiba	\$150.00/dhacdadiiba

Qorshaha Ilaalinta Aaladdu **ma** daboosho waxyaabaha soo socda

- Beddelaadda jaajar amd gal lumay
 - \$20 oo ah jaajarka luma
 - \$25 oo ah galka luma
- Luminta hotspot-ka
 - \$40 oo ah hotspot-ka luma
 - \$5 oo ah jaajarka hotspotka luma
- Dhaawac ula kac ah ama xadgudub

- 
- Dayactirka buuxa ama kharashka beddelka ayaa laga yaabaa in la qiimeeyo
 - \$299 oo ah iPad-ka
 - \$180 oo ah Chromebuugga



Xidhmada Aaladaha Ardayga

Marka ka bixitaanka Dugsiyada Aagga Robbinsdale, ardaydu waxay u baahan yihiin inay ku celiyaan aaladda iyo agabkaba xarunta warbaahinta dugsigooda. Haddii alaabta la soo celin waayo, ardayga iyo waalidkood/masuulkooda waxa lagu soo dalacayaa kharashka beddelka.

Dhammaan aaladaha waa in la soo celiyaa dhammaadka sannad dugsiyeedka. Sannad kasta, aaladaha waxaa ka hubiya inuu waxyeelo soo gaaray shaqaalaha. Tani waxay hubinaysaa in ardaydu heli doonaan aalad shaqaynaya sannad dugsiyeedka soo socda.

Haddii ardaygu doorto inuu haysto aaladda inta lagu jiro xagaaga, qoysku weli waxay ku xiran yihiin khidmadaha burbur iyo beddelaadda, ardayguna waa inuu sii wadaa inuu raaco Nidaamka Isticmaalka la Aqbali karo ee degmada. Haddii ardaygu ku guuldaraysto inuu soo celiyo aaladda iyo agabka (kiis, xarigga, iyo jaajarka), waxa lagu qiimayn doonaa kharashka beddelaadda alaabta maqan. Kharashyadan waa laga fogaan karaa haddii qalabka ama alaabta maqan lagu soo celiyo iyada oo aan waxyeello gaarin.

Isticmaalka Aaladaha

Rdale waxay siisaa arday kasta oo ku jira fasalada K-12 helitaan aalad dhijitaal ah. Aaladdu waxay ku xidhaa ardayda hawlaha barashada fasalka iyo fursadaha waxbarasho, waxayna shakhsiyeysaa khibradaha waxbarasho ee arday kasta. Aaladda dhijitaalka ah badanaa waa Chromebuugga ama iPadka. Si aad u heshaan hagiis ku saabsan sida guriga loogu isticmaalo aaladda adiga iyo ardaygaaguba, fadlan la xiriir macalinkooda ama khabiirka warbaahinta dugsiiga.

Heshiiska Isticmaalka Teknoolajiyadda ee Qoyska iyo Ardayga

Sida ku qeexan Xeerka Guddiga Rdale 524, waalidiinta iyo ardaydu waxay u baahan yihiin inay dhammaystiraan Heshiiska Isticmaalka Tignoolajiyada Qoyska iyo Ardayga billowga sannad dugsiyeedka kasta. Waqtigaas waxay sidoo kale iibsanaa karaan Qorshaha Ilaalinta Qalabka (DPP). Waxaad heli doontaa nuqul daabacan ka hor billowga sannad dugsiyeedka kasta. DPP waxa lagu iibsanaa karaa onlayn iyada oo loo marayo Dukaanka Iskuula ee Infinite Campus (<https://www.rdale.org/discover/technology>). Qoysasku waxay iibsanaa karaan Qorshayaasha Ilaalinta Aaladda dhammaan ardayda qoyska hal mar. Qoysaska doorta inay shakhsi ahaan u iibsadaan DPP waa inay bixiyaan kharashka qorshaha arday kasta si gaar ah.

Macluumaadka Qoysaska

Rdale waxay isticmaashaa barnaamijyo iyo codsiyo badan. Waxaan isticmaalnaa dhowr madal si aan xogta ugu gaarsiinno qoysaska. Rdale waxa ay siisaa ilo qoysaska si ay ula socdaan waxa ardaydoodu baranayaan. Madalahaas waxaa ka mid ah LearnPlatform, Infinite Campus-ka, Schoology-ga, iyo SeeSaw-ga. Waxaan u isticmaalnaa Clever si aan u siino ardayda hab ku habboon oo ay ku galaan codsiyada wata hal magac isticmaale iyo erayga sirta ah.



LearnPlatform

Tiknooliyada Rdale waxay isticmaashaa LearnPlatform si ay ula socoto oo u ururiso macluumaadka ku saabsan codsiyada dhijitaalka ah ee kala duwan ee aan ku isticmaalno degmada. LearnPlatform waxaa ku jira maktabad dadweyne oo agab ah ilo loo oggolaaday ku isticmaalka halkan. Qalabka la ansixiyay waxay soo mareen nidaam tifaftira ee tiknoolajiyada iyo manhajka & qaab waxbarashada, oo ay ku jiraan shuruudaha amniga iyo ilaalinta xogta ardayga, iyo sidoo kale qiimaha waxbarashada. Maktabada LearnPlatform ee Rdale waxay ku siinaysaa xarun dhexe si aad dib ugu eegto codsiyada loo oggolaaday isticmaalka gudaha Rdale.

Si aad u gasho maktabadan, fadlan booqo: <https://rdale.app.learnplatform.com/new/public/tools>

Infinite Campus-ka

Rdale Infinite Campus waxaa loo isticmaalaa in lagu maareeyo macluumaadka ardayga. Qoysasku waxay macluumaadkan ka heli karaan Marinka Waalidka ee Infinite Campus. Ka raadi fiidiyowiyada waxbarasho ee Infinite Campus-ak bogga internetka ee Waaxda Tignoolajiyada: <https://www.rdale.org/discover/technology>.

Isticmaal marinka si aad u hubiso natijada, dhibcaha, qoraalada, macluumaadka caafimaadka, macluumaadka dabeecadda, jidadka baska, iyo jadwalka fasalka. Qoysasku waxa kale oo ay maamuli karaan dookhooda xiriirka iyaga oo dooranaya sida ay rabaan in loo helo farriimaha (wacida telefoonnada, iimaylka, ama farriimaha qoraalka ah).

Schoology-ga

Ardayda fasallada 4-12 waxay u isticmaalaan madal la yiraahdo Schoology shaqada, xogaha cusub ee fasalka, iyo munaasabadaha kalandararka qaarkood. Qoysasku waxa ay ku helaan iimaylka soo koobid toddobaadle ah. Si aad uga gasho portal-ka Schoology-ga, guji xiriirinta Schoology-ga ee bogga Waaxda Tignoolajiyada: <https://www.rdale.org/discover/technology>.

Schoology-ga ardaydu waxay karaan:

- Helitaanka agabka koorsada
- Gudbiyaan waxqabadka
- Kula xiriiraan ardayda fasalka iyo macalimiinta
- Hubi darajooyinka, shaqada maqan iyo darajooyinka layliyada qof ahaaneed
- Ka qaybgalka doodaha khadka tooska ah
- Dib u eegista ogeysiisyada maalinlaha ah
- Akhrinta isgaarsiista dugsiga iyo/ama lataliyaha

Seesaw-ga

Ardayda fasallada K_3 waxay isticmaalaan Seesaw-ga, madal loogu talagalay inay ku muujiyaan waxbarashadooda. Ardaydu waxay qaadi karaan sawiro, xardhi karaan sawirro, duubi karaan muqaal, iyo in ka badan. Macallimiintu waxay sidoo kale la wadaagi karaan qoraallada, sawirrada, iyo fiidiyowiyada qoysaska. Qoysasku waxay heli doonaan koodhka gelitaanka si ay ugu xidhaan koontada ardaygooda iyo abka Seesaw-ga.



Ilaha dheeraadka ah ee qoysaska

[Warbaahinta Dareenka Guud \(commonsensemedia.org\)](http://commonsensemedia.org) waxay ku siinaysaa macluumaadka ku saabsan dhalashada dhijitaalka ah iyo hagayaasha ka doodista tignoolajiyada. Tani waa ilo cajiib ah oo loogu talagalay qoysaska raadinaya qiimaynta hagida waalidnimo ee buugaagta, filimada, iyo bandhigyada TV-ga. Ka raadi talooyin ku saabsan wakhtiga shaashadda, badbaadada khadka, baraha warbaahinta bulshada, iyo in ka badan.